# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

| Opened: - 10:31 AM | Hansard No.24/3 | Kal-fadhiga 24aad |
|---|---|---|

**Speaker: -** Md. Baashe M. Faarax | Fadhigii 17aad ***09/06/2014***

***Dooda Xeerka Komishanka HIV/AIDska maalin kaliya ayna ka qeyb-qaateen 9 Mudane***

1. **Md. Xaamud Cismaan Jibriil:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafadaba waan salaamayaa, Xeerkan kii shaleyto waa la isiiyay kan hada ayaa la ii dhiibay, anigu waxaan u arkaa in dalkeenu yahey dal islaamiya sida **Qodobka 5aad** ee dastuurkuna tilmaamaysna Xeerarka dalkan lagaga dhaqmayo waa in loo dajiyo si islaamiya, markaa anigu Hay'add abuurka Xeerkan HIV/AIDSKa gabi-ahaanba waxaan u arkaa inaan loo baahneyn.

   Waxa shareecadu inoo tilmaantey in ilaahey Xukun ka soo dejiyay samada tilmaamaya "inanynaa u dhowaan sinada oo tahey faaxisho iyo wado-lamaro tan ugu xun" hadii loo baahdo in la daweeyo Cudurkan dadka qaba waxaa dawo u ah caanaha Geela iyo kaadidiisa oo ka dawo ah cadeyntiina waa la hayaa (Prove), dadka soo qaadey Xanuunkaa dalal shisheeye oo loo qabtey inay saddex bilood noolaad oo laba sanadood ku laabtey iyagoon xanuunkii qaban oo dhakhaatiirtii aad ula yaabeen.

   Hadii loo baahdo xakameyn way furan tahey, xuduudka dalkeenu wuu furan yahey barigii hore itoobiya oo kaliyaa inoo furneyd imikana meelkasta way inoo furan tahey oo waad arkeysa wax dad ajaaniba dalkeena jooga, dalalka iska xakameeya cudurkan sida Golf stateka waxay leeyihiin qofkasta oo dalalkooda ka soo dega dhiiga ayaa la Scan gareeyaa, inagu malihin, waxaa fiican Wasaarada Caafimaadku inay sameyso qalabkii lagu scangareynayay dadka dhiigooda, protectionku waa kan ilaahey soo inoo sheegay ee ah inaynu ka fogaano Sinada iyo Xumaanta.

   **Markaa aniga waxay ila tahey:-**

   - Inaynu gabi-ahaanba Celino Xeerkan oo aan loo baahneyn.

2. **Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayashu way salaaman yihiin, intaa ka dib anigu si fiican baan u soo akhriyay waa xeer aad loogu baahan yahey waa xeer xakameynaya AIDSka, sidaa darted inkastoo xildhibaankii iga horeeyay sheegeen dastuurku sheegay in diinta la mariyo xaga hore, hadana laakiin inaga dastuurka ayay Xeerarku ku saleysanyihiin.

   **Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Xeerkani waaa xeer loo baahna yahey oo ay aheyd in mar hore la sameeyo waxaan soo jeedinayaa in sida ugu dhakhso badan loo ansixiyo.

3. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayashaba waan salaamaya, Gudoomiye Xeerka hore waa inagoo uga doodney, waxaynu u saarney Guddi, hore Gudi ayaa u keentay, waxaad moodaa in Gudidu dhamaan dhinac mareen Doodii Xeerka iyo soo jeedintii Gudidda Arrimaha Bulshada.

   Anigu hore waan u sheegay hay'addaha noocan ah marka la sameynayo laba waa inu mid uun noqdaa, Waa inuu Komishan noqdaa oo ay noqdaan Gudi mar la wada magacaabay oo madaxweynuhu wada magacaabo iyaguna iska dhex doortaan Gudoomiye iyo ku-xigeenkiisa, ama inaynu u dhisno sida hay'adda Shaqaalaha oo kale, hay'addan waxay isku nooc yihiin sida ay dhisan tahey Hay'adda NERAD oo kale, hay'addasi sida ay shaqeyso qaab-dhismeedkeeda aynu ka dhigno, hay'adda NERAD Gudoomiyaha uun buu Madaxweynuhu Magacaabaa, agaasime Waaxeedyadana Gudoomiyaha Magacaaba.

   Laakiin agaasime Waaxeedyo madaxweyne magacaabo oo isku nooca nidaamka dawladnimo kuma jirto, horena looma arag bal soo hela idinku agaasime waaxeed Madaxweyne magacaabo, madaxweynaha yaynaan caayin, agaamise waaxeed madaxweyne magacaabo waa tii ugu horeysay ee aan arko, madaxweynuhu DG iyo wixii ka sareeya ayuu magacaabaa.

   Markaa waxaan soojeedin lahaa, sdii hore xeerka uu ahaa qaab dhismeedku aynu deyno ama komishan aynu ka dhigno oo dhamaan intuu madaxweynu soo wada magacaabo iyagoo wada siman, labadaa waxaan aheyn ma jirto.

   Hadaan Xeerka u soo dego, **Qodobka 11aad** oo u dhignaa sidan "**Madaxweynaha ayaa ah Gudoomiyaha Komishanka, waxaana socodsiinta hawlaha uga wakiil ah Agaasimaha Fulinta**" markaa waxaan leeyahay sidaa ha loo daayo hore oo sida Gudidu ka dhigtey ha laga daayo.

**Qodobka 14aad** anigu waxaan soo jeedinayaa in Agaasimaha Fulinta oo kaliya Madaxweynuhu magacaabo, agaasime waaxeedyadana isaga loo daayo, hadii aan xeerka laga dhigeyn Komishan Madaxweynuhu wada magacaabayo.

**Qodobka 15aad** wax ceeba malaha inuu la tashado laakiin awooda agaasimaha ayaa isla leh, **F/2aad** sidoo hore ayay sax ku tahey

**Markaa waxaan Soo jeedinayaa:-**

- Sidii hore Xeerka la inoogu keenay aynu ku ansixino ama golaha oo dhan aynu isla qaadano oo Komishan aynu ka dhigno labadaa option uun baa inoo yaal.

4. **Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Shaqaalaha Golaha dhamaan waan idin salaamaya anigu waxaan u baxay hal qodob oo gaaban inaan wax ka idhaahdo, sideedaba inagu dhisme ahaan waxaynu leenahay korjoogid iyo indho indheyn dib u eegis xeerarkii Goluhu fuliyay iyo waaxda fulintu siday ugu dhamayaan, waxaad moodaa mar walba oo aynu xeer sameyneyno aynu eegno waaxda fulintu sideynu u shaqeynayno laakiin aynaan eegin oo ku darin farqad ka hadleysa Goleheenan Wakiilada qaabka ay ula xidhiidhayaan hay'adda fulinta ee xeerka ku dhaqmeysa.

   Aad baan ugu mahadnaqayaa Guddidi arrimaha bulshada ee xeerka soo eegtay iyo Gudidan adhoc committee ga aheyd, Markaad eegto **Qodobka 7aad** ee Asaasida Golaha Hagida ee Komishanka oo ka kooban Wasiiro laguma darin cid wax ka ogaata hagida iyo siday ay shaqeyneyso hay'addu, taa anigu waxba kama qabo.

   laakaiin halka qodobka ku saban warbixinta ee **Qodobka 21aad F/1aad** oo sheegaya **"Agaasimaha fulintu wuxuu sannad kasta dhamaadkiisa soo saarayaa warbixin faah-faahsan oo uu u gudbinayo golaha hagidda"** halkaa anigu waxaan ku dari lahaa soo jeedinteyda halka farqada ugu dambeysa **"iyo Golaha Wakiilada"** si goluhu u ogaado halka ay mareyso hadba xaalada HIV/AIDSku oo aaney hadba waxay soo qorteen uun inoo keenine ay warbixin inoo keenaan oo waliba aan jeclaan lahaa in sanadkii 2 jeer laga dhigo, waayo xaalada Cudurkani waa mid xasaasiya. **(Seconded ayuu qodobkaasu helay)**

**waxaana soo jeedinayaa:-**

- Marka inta lagu daro  in xeerkan sida ugu dhakhso badan loo ansixiyo.

5. **Md. Maxamed Cumar Aadan:-** ASC WB, marka ugu horeysa waa inaynu isla garanaa qofka masuulka ka ah shaqooyinka ee lagagala xisaabtamayo inay Fulinta, markaa waxaan odhan lahaa qodobadan aynu u aragno inay isku soo noqnoqonayaan magacaabista oo kale hadey noqoto madax komishanka iyo hay'addha Madaxweynaha ayaa iska leh oo dastuurka tilmaamey.

   Agaasimaha Fulinta halka ah waxaan anigu ka dhigi lahaa oo ku haboon agaasinka fulinta, qodobka kale ee aan ku dari lahaa waxa weeye inagu waxaynu leenahay inaynu sharci sameyno oo ilaalino sharcigu siduu u shaqeyn lahaa  oo ogaano waxay qabanayaan, laakiin waa khalad inaynu nidhaahno wixii la sameynayoba inagu aynu isku darno, markaa inagu inaynu qeyb ka noqono wixii la sameynayo oo wax la soo sameyno, kolkaa waxaan qabaa inaynaan ku deg-degin oo odhan wixii la sameynayo golaha wax ha lagaga daro.

6. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** run ahaantii marka aan yare eego xeerkan komishanka AIDSka, waxaad moodaa inuu xeerkani u dhigan yahey oo kaliya asaasida iyo asees u dhigida Gudidda Komishanka oo aanay ku jirin wixii Gudidaasi ku shaqeyn laheyd oo qaab dhismeedkii, marka Gudi la sameyno iyo marka waxay ku shaqeyn laheyd la sameynayo, Wuxuu kala horeysiinayaa xeerku asaaskii iyo qaab-dhismeedkeedii, qaab dhismeedka ku xusan **Qodobka 6aad** ee Xeerkan maaha mid dhameystiran, laakiin komishankii Xeerkan lahaa kama muuqdo qaab dhismeedkiisii.

   ma 7da xubnood ayuu ku soconayaa oo hogaaminaya mise komishankani waa mid ka duwan komishanadii hore u jirijirey, waxaad moodaa inaaney taasi xeerkan ku cadeyna, waxaa kaloo xeerkan ku jirta **Qodobka 7aad** asaasida golaha hagida ee komishanka, markaa hadii yahey golihii fulinta waa iney halkan ku cadaato haduu yahey kuwii hawlmaalmeedka hagayay ay yihiin, hadii kale golihii maamulka uu yaheyna waa inay halkan ku cadaato, Gudidda Hagida 7 wasaaradood baa laga dhigey, markaa waa in la cadeeyo inay fulintii yihiiin iyo in kale.

   **Qodobka 8aad** dhismaha Agaasinka Fulinta ku qoran oo iyana qeybo-badan ah oo lix xubnood ah, markaa waxaad moodaa inaaney isku sal balaadhneyn

hawshii caadiga aheyd ee komishankii iyo qaab-dhismeedka uu xeerkani u sameynayo.

Laba arrimood oo taageerayo sidii mudanihii iga horeeyay sheegay oo ah in Xeerka ka muuqato Komishankii xubnaha iyo qaab dhismeedkoodii leh oo loo sameeyo oo xeerka ay ku cadaato ama Gudi qaabkeeda oo kale u dhigan oo hawshani hoostimaado madaxweynuhuna magacaabo inay noqoto, labadaa mid uun bay noqoneysaa, laakiin in labadaba la is cunsiiyo meesha kuma jirto.

Waxaa kale oo Xeerka ku jirta **Qodobka 10aad** Xilka iyo Waajibaadka Golaha Hagida, laakiin kuma qorna awoodii golaha qodob ahaan oo kaliya ayay ugu jirta, labadii awoodood ee labada qeybood waxaad moodaa inay hoosgalayaan.

**Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- Marka la is raaciyo Soo jeedinta Gudidda loo saarey iyo Xeerkan gudihiisa wax ku qoran in dib gudiddii ku shaqada laheyd loogu celiyo oo labada qaab mid ahaan qaataan, inta ka horeysana aan waxba la ansixin.

7. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** horta ilaahey sida kheyrka leh ha inaga waafajiyo, Mudanayaal markasta oo aynu xeer sameyneyno waa ineynu maskaxda ku heynaa in la helo cidda xeerkan ku shaqeyneysa in cid kasta oo hawl heysa, xeerkaa gudihiisa in wixii guud laga qaato oo aanu wax is khilaafaya Xeerku yeelan, inagoo ilaalineyna Maamul wanaaga, waa in laga daayo xeerka aynu sameyneyno wax is khilaafa oo wixii khilaafaya waa in laga saaro, masuuliyad kasta waxay leedahay kala dambeyn iyo cid lagala xisaabtamo oo loo raaco, waa inaaney noqon mid loolan dhexdooda ka keenta.

   Marka la yidhaahdo Agaasin fulineed maaha in hawshaa ay wada leeyihiin agaasinka fulinta, waxa weeye cida wada shaqeyneysa inay hawsha iyo shaqadu u kala soocnaato oo hawlkasta ay yeelato cid lagala xisaabtamo xumaanteeda iyo wanaageeda oo aaney isku cuna duubnaanin, sidaas ayaa maamulka quruxdiisa iyo wanaagiisu ku muuqaneysaa.

   Markaa halka **Qodobka 1aad** ee erey bixinta waxaan soo jeedinayaa in lagu daro *"Xidhiidhiyaha Gobolka ama Degmadu"* wuxuu yahey oo si fiican loo qeexaa, kalmad kale oo ku jirta **Qodobka 18aad** *"Golaha Isku duwida"* Markaa golaha Isku duwidu muxuu yahey, waxaynu heynay Golaha Hagida iyo Golaha kormeerka, Markaa Labada Gole ee Golaha isku duwida iyo Golaha Kormeerka

oo qodobka 18aad ku jirta, labada gole waxay u baahan yihiin in la isku daro hadii kale Macnahooda waxay yihin erey bixinta lagu daro.

8. **Md. Naasir X. Cali Shire:-** ASC, Mudanayaal, **Qodobka 14aad** wuxuu sheegayaa in Madaxweynuhu soo wada magacaabayo Agaasimaha Fulinta iy Agaasime Waaxeedyada, markaa wxaan leeyahay ha laga daayo in Madaxweynuhu soo magacaabo Agaasime Waaxeedyada, waayo waxay noqoneysaa marka dambe in madaxweynuhu soo magaabo nadiifisada, markaa ha laga daayo ayaan soo jeedinayaa inuu Agaasime waaxeed soo magacaabo.

   **F/2aad** ee isla qodobkaa aqoonta jaamacadeed ma qeexna oo ma cada, jaamacaduhu waxay leeyihiin 3 degree oo kala duwan markaa waa degreegee, sidoo kale waa ina la qeexaa aqoontu nooca ay noqoneyso ma aqoonsharci, ma beeraha, ma dhaqaalaa, markaa waa in la cadeeyo miyaa la iska qaadanayaa qofka, kuma filna aqoon jaamacadeed oo kaliya.

9. **Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Shir-gudoonka iyo Mudayaasha marka hore waan idin salaamaya, anigu laba qodob uun baan ka hadlayaa oo ku saabsan Xeerkan, qodobka hore waxaynu ogsoonahey inay jiraan cuduro badan oo faafa, sida AIDSka, markaa madaama ay jiraan cuduro kale oo faafa oo ka mid yahey qaaxadu, daacuunku iyo Duumada iyo AIDska oo aynu manta heyno Xeerkiisii, AIDSka sabab kaligii aynu uga hadalno ma jirto.

   **Markaa waxaan soo jeedinayaa** inaynu Ansixino cudurada faafa oo dhan la iskaga dhigo komishan hay'add, oo aynu sameyno Xeer la yidhaahdo **Xeerka Hay'dda Xakameynta Cudurada Faafa.**

   Tan kale wixii lagu caawinayo ee inaga miisaaniyadeena uga go'aya iyo wixii aduunku ku caawinayo meel loogu mideeyo, sidoo kale dadka ku shaqeyneya ay noqdaan dad waaya aragnimo iyo aqoon u leh.

   Qodobka kale waxa weeye Xeerka waxaa ku jira Qodob odhanaya inaan la kareyntimeyn dadka Cudurkan HIV/AIDSka qaba, taasi waxa weeye ha la faafiyo, markaa waxaan soo jeedinayaa dadka xanuunkaa qaba sida TBda meel loogu sameeyay meel lagu xereeyo loo sameeyo oo gooni ah, oo waa in laga daayo inaan la kareyntimeyn oo dadka ha lagu sii dhex daayo, intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa.

**Adjournment (Gabo-gabadii)**

**Gudoomiyaha:-** way mahadsaniyhiin Mudanayaashu, Doodii xeerka mudanayaashii isu diiwaangaliyay intaasey ahaayeen, Xogheynta ayaa bari isku soo ururineysa dooda Xeerka, markaa fadhigii barito waa fasax, Maalinta Sabtida ayaynu Xeerka marka la isku soo guro go'aanka ka gaadheynaa

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |